



Diiradda la saarayo: Doorashada daryeel bixiye

Waa muhiim in xiriir is aaminaad ku dhisan lala lahaado dhammaan daryeel bixiyayaashaada — oo ay ku jiraan daryeel bixiyayaasha jirka, ilkaha iyo caafimaadka dhimirka. Xiriir dhow wuxuu ka dhigan yahay in daryeel bixiyahaagu uu si fiican u yaqaan adiga iyo caafimaadkaaga, oo aad kalsooni ku qabto marka aad aragto isaga. Health Share/CareOregon waxay rabaan in ay kaa caawiyaan dhisida xiriir iyo helitaanka daryeel bixiye si fiican kuugu shaqeeya adiga.

Sida loo doorto daryeel bixiye



- ▶ **Goobta:** Miyay kuu dhow dahay?
- ▶ **Waxa kaa dhiga qofka aad tahay:** Miyay fahmi doonaan arrimaha la xiriira jinsigaaga, jinsiyadaada, dookhaaga galmo, diintaada, taariikhdaada shaqsi ahaaneed, dhaqankaaga ama waxa kaa dhiga qof gaar ah?
- ▶ **Luqadda:** Miyay ku hadlaan luqadaada?
- ▶ **Habka daryeelka:** Miyay bixiyaan adeegyada aad rabto?

Dhisida xiriirka



Xiriir wanaagsan, oo dhow oo lala yeesho daryeel bixiyaha:

- ▶ Waxaad daryeel bixiyahaaga kala hadli kartaa waxyaabaha qofka u gaarka ah.
- ▶ Waxaad dareemaysaa in lagu dhageystay oo aad badbaado qabto.
- ▶ Waxaad ogtahay in daryeel bixiyahaagu u doodi doono baahiyahaaga gaarka oo ku siin doono talo aad ku kalsoonaan karto.

Beddelida daryeel bixiyayaasha

Haddii aad rabto iska beddesho hal daryeel bixiye oo u wareegto mid kale, taasi waa mid caadi ah.



Si aad u beddesho daryeel bixiyahaaga:

- 1 Waxaad heshaa daryeel bixiye cusub oo aad jeclaan lahayd in aad tijaabiso:
 - a. Iyada loogu talagalay caafimaadka jirka, booqo [careoregon.org/find-a-provider](https://www.careoregon.org/find-a-provider)
 - b. Iyada loogu talagalay caafimaadka dhimirka, booqo [healthshare-bhplan-directory.com](https://www.healthshare-bhplan-directory.com)
 - c. Iyada loogu talagalay caafimaadka ilkaha, la xiriir qorshahaaga ilkaha (ee ku qoran kaarkaaga Aqoonsiga Xubinimo).
- 2 Ama, Adeega Macmiilka ka wac 800-224-4840 ama TTY 711 waxaan kaa caawin doonaa in aad hesho daryeel bixiye cusub.
- 3 Marka aad hesho daryeel bixiye cusub, wac iyaga oo ka sameyso balan.

Su'aalaha?

Haddii aad hayso wax su'aalo ah oo ku saabsan doorashada ama beddelida daryeel bixiyayaasha, ama u baahan tahay wax caawimaad ah oo kale, waxaad Adeega Macmiilka CareOregon ka wacdaa 800-224-4840 ama TTY 711, ama farriin ammaan ah noogu soo dir [careoregon.org/portal](https://www.careoregon.org/portal)

Adeegyada luqadda waxaa bixiya CareOregon, qorshahaaga caafimaadka Medicaid. Halkan ka ogow waxyaabo badan oo nagu saabsan.

Marka ay dadku ka hadlaan Medicaid ka jirta Oregon, waxaa dhici karta in aad maqasho iyaga oo dhahaya magacyo iyo warqado badan oo kala duwan. Sababtu waa in ay jiraan ururo badan oo ku lug leh xaqijinta in aad hesho daryeelka aad u qalanto. Sidee baad macne ugu yeeli kartaa haba yaraatee?

Waxay gacan ka geysataa in aad uga fikirto Medicaid ka jirta Oregon in ay tahay sida qaabka pyramid oo kale.

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa gacanta ku haya barnaamijka Medicaid ee loogu talagalay gobolka Oregon oo dhan, kaasi oo loogu yeero Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP).



Health Share of Oregon (HSO) waa waxa loo yaqaano daryeelka ururadu iska kaashadeen (CCO). Health Share of Oregon waxay ka hoos shaqeysaa OHA si ay ugu adeegto xubnaha ka tirsan OHP ee ku nool degaanka saddexda-magaalo ka kooban.



CareOregon waa mid ka mid ah dhowr bixiyayaasha caafimaadka oo ku yaala degaanka saddexda-magaalo ka kooban oo Health Share CCO ka caawiya n ay bixiso daryeel. Waxaan sidoo kale gacan ka geysanaa faa'iidooyinka daryeelka caafimaad iyo adeegyada ee loogu talagalay xubnaheena.



Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP) wuxuu noqon karaa dhakhtar, kalkaaliso sare, kalkaaliyaha dhakhtarta ama daaweynta bedelka ah 'naturopath'. Waxay isku duwaan daryeelkaaga aad la leedahay CareOregon iyo xubnaha kale ee kooxda caafimaadka sida dhakhaatiirta ilkaha, bixiyayaasha daryeelka caafimaadka maskaxda, farmashiyayaasha iyo kuwo kale.



CareOregon waxay bixisaa adeegyada kuwan oo kale ah ee loogu talagalay xubnaha Medicaid (OHP):

- ▶ Daryeelka caafimaadka jirka
- ▶ Daryeelka caafimaadka dhimirka
- ▶ Isticmaalka mukhaadaraadka
- ▶ Daryeelka ilkaha
- ▶ Medicare la sii marayo CareOregon Advantage
- ▶ Daryeelka bukaanka hospice ama daaweynta oo la adeegsanayo Bixiyayaasha Housecall

Waxaad sidoo kale awoodi doontaa in aad isticmaasho adeegyo muhiim ah sida kuwani oo kale:

- ▶ Isku duwida daryeelka
- ▶ Farmashiyaha
- ▶ Daryeelka dhalashada ilmaha ka hor iyo daryeelka dhallaanka
- ▶ Kala doorashada gaadiidka
- ▶ Adeegyada turjumaada luqadda
- ▶ ER iyo daryeelka degdega ah

Waxaad heli kartaa tani oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Caawimaadani waa lacag la'aan ah. Wac 800-224-4840 ama TTY 711.